



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell:252612008723, info@sonsaplatform.org, executivedirector@soscensa.org, www.sonsaplatform.org

WAR SAXAAFADEED

Mogadishu 25 Oktobar 2025;

Xubnaha ururada bulshada ee Daladda SONSA oo maanta shir isugu yimid ayaa waxaa looga hadlay xaaladda dalka maanta uu marayo iyo sida ay bulshada rayidka gacan uga geysan laheyd xalinta caqabadaha jira.

Khilaafka siyaasadeed

Bulshada rayidka waxa ay aad uga xun tahay khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya madaxda dowladda federaalka iyo hoggaamiyayaasha dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka qaarkood, kaasoo caqabad ku noqday dhismaha geedi socodka dowlad-dhiska iyo amniga dalka. Xalka khilaafka siyaasadda waxa uu ku imaan karaa wadahalalo loo maro sharciga iyo dastuurka ku meel gaarka ah.

Bulshada rayidka waxa ay u aragtaa sii socoshada dib u dhaca doorashooyinka maamul goboleedyada qaarkood mid lid ku ah dimuqraadiyada iyo dowlad wanaagga. Sidaas darteed, waxa ay ku baaqeysaa in sida ugu dhaqsiiyaha badan loo qabto doorashooyinka dowlad goboleedyada.

Wadahadalada waa sida kaliya ee lagu gaari karo xalka siyaasadeed ee ku aaddan xalinta caqabadaha hortaagan doorashooyinka heer federal iyo dib u eegista dastuurka ku meel gaarka ah.

Hadaba Bulshada Rayidka waxa ay ugu baaqeysaa dowladda federaalka in dib loo bilaabo gogosha wadahadalka siyaasadeed ee kala dhaxeeyey siyaasiyiinta madasha samatabixinta.

Aragtida bulshada rayidka ee ku aaddan xalka khilaafka siyaasadda waa mid ku qotonta sidii loo heli lahaa xal waaro. Sidaas darteed, bulshada rayidka waxa ay ka shaqeyn doonta sidii loo dhisi lahaa guddi ka kooban qaybaha kala duwan ee bulshada rayidka sida odoyaasha dhaqanka, culumo udiinka, aqoonyahanada, haweenka iyo dhalinyarada, guddigaas waxa uu fududeyn doona wadahadalada dowladda federaalka iyo hoggaamiyayaasha siyaasadda ka aragti duwan. Sidoo kale, bulshada rayidka waxa ay qabanqaabin doonta wadahadal heer qaran oo bulshada rayidka ah kaasoo laga soo saari doono talooyin xal u noqon kara khilaafka siyaasadeed ee soo noqnoqday.

Xubnaha shirka ka soo qayb galay waxa ay isku raaceen in aan laga maarmi karin abuuritaanka xafiis ka shaqeeya isku xirka iyo xiriirinta dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka si arrimaha laysku afgaran waayo talo looga soo saaro, iyagoo xoojin doona isla xisaabtanka.

Arrimaha dhulka dowladda

Bulshada rayidka waxa ay u aragtaa sida ay dowladda u maareysay dhulka dowladda oo ay degenaayeen dad rayid ah oo siyaabo kala duwan uga soo qaxay meelihii ay degenaayeen in ay ahayd xad-gudub bani'aadanimo, taasoo saameyn ku yeelatay dad ka badan 100,000 oo muwaadiniin ah.

Bulshada rayidka waxa ay ku baaqeysaa in dowladda u saarto guddi ka kooban dowladda federaalka, maamulka gobolka Banadir, iyo bulshada rayidka, guddigaas oo u kuurgala sameynta ka dhalatay arrimaha dhulka, dhageysiga cabashada dhibanayaasha, iyo sida wax looga qaban karo dhibaatooyinka ka dhashay arrimaha dhulka.

Arimaha doorashooyinka Gobolka Banadir

Bulshada rayidka waxa ay soo dhaweenaysaa doorashooyinka la filaayo in laga hirgeliyo gobolka Banadir, taasoo ay u aragto mid muhiim u ah in dadka ku nool degmooyinka gobolka Banadir ay doortaan gole deegaan oo u fuliya adeegyada ay u baahan yihiin.

Bulshada rayidka waxa ay gacan ka geysan doontaa hirgelinta doorashooyinka golayaasha deegaanka iyagoo qaban doono wacyigelin iyo kor joogteyn ku aaddan doorashooyinka.

Haddaba, si doorashooyinka golayaasha deegaanka u noqdaan kuwa lagu kalsoonaan karo, waxa ay bulshada rayidka soo jeedinaysaa talaabooyinkan hoos ku qoran.

1. In la ilaaliyo madax-bannaanida guddiga doorashooyinka.
2. In dhaqaalaha ku baxaya doorashooyinka ay noqdaan kuwa ay u madax-bannaan yihiin maamulkooda guddiga doorashooyinka.
3. Hirgelinta wacyigelin balaaran oo ku aaddan nidaamka doorashooyinka, qaabka codeynta, iyo dhismaha guddiyo xoojiya howlaha guddiga doorashooyinka.
4. In ururrada siyaasadda loo fududeeyo dhaqdhaqaaqa ololaha iyo warbaahinta dowladda iyo kuwa madax-bannaan.
5. In loo asteeyo ciidamo gaar ah oo suga amaanka goobaha doorashooyinka, musharaxiinta, iyo codeeyaasha, isla markaasna si dhow ula shaqeeya guddiga doorashooyinka.
6. Ilaalinta xuquuqda musharaxa iyo codeeyaasha xilliga ololaha iyo codeynta.
7. In la badiyo goobaha doorashooyinka si waqti badan uga dhumintir codeeyasha.

Ugu dambeyntii, bulshada rayidka waxa ay ugu baaqaysaa in laga fogaado wax kasta oo abuuri kara caqabad ku aaddan doorashooyinka golayaasha deegaanka ee gobolka Banadir, lagana hortago wax kasta oo dhaawici kara kalsoonida shacabka ee doorashooyinka golayaasha deegaanka.

END

